



# Countywide Planning Policies

## Public Facilities and Services



### Dulmarka

Cutubka Public Facilities and Services (Xarumaha iyo Adeegyada Dadwaynaha) ee **Countywide Planning Policies** (CPPs, Xeerarka Qorshaynta ee Degmada oo Dhan) ayaa haggaa maamulada maxaliga ah si ay u baxshaan adeegyada bulshada sida biyaha, bulaacad qaadista, isgaarsiinta, iyo dugsiyada qaab waafaqsan qorshayaasha kobaca kuna bixinaaya adeegyada si sinaan iyo waxtar leh.

Maamulada ayaa laga doonayaa inay qorsheeyaan baahiyaha mudada fog ayna lahaadaan awood ay ku taageeraan kobaca mustaqbalka iyo sidoo kale ay wax uga qabtaan caqabadaha ku horgudban bixinta adeegyada dadwaynaha xili cimiladu isbadalayo. Cutubka Public Facilities and Services waxa uu sidoo kale dhiiri gelinayaa in maamulada maxaliga ah ay isku dubaridaan adeegyada dadwaynaha ayna ku baxshaan qaab qiimo jaban oo la isku halayn karo.

### Isbadelada Xeerka

Isbadalada lasoo jeedshay in lagu sameeyo cutubka Public Facilities and Services waxaa diirada lagu saarayaa ka jawaabida isbadalada lagu sameeyo xeerka iyo sharciga gobalka, iyo door siinta sinaanta bixinta adeegyada dadwaynaha dhammaan daafaha King County.

Isbadalada diirada lagu saaray sinaanta ayaa ku haga maamulada inay muhiimada siiyaan adeegyada dadwaynaha iyo maalgashiyada xarunta gudaha bulshooyinka taariikhiyan adeegyada laga qadin jiray si loo xaliyo kala saraynta, ayna ku jiraan doorka wayn ee dadwaynaha laga siinaayo ayadoo xarumaha dadwaynaha laga dhisaayo ama lagu balaarinaayo, lana firdhinaayo saamaynada iyo faa'idooyinka wadaaga ah ee xarumaha cusub si siman.

Isbadalada dheeraadka ah ayaa xalinaaya baahida u diyaar garoowga masiibada iyo ka fiirsiga isbadalka cimilada marka la dhisaayo ama la balaarinaayo xarumaha dadwaynaha.

### Saamaynada Isbadelada Xeerka

- Waxay kordhinaysaa helitaanka qiimaha jaban ee loo siman yahay ee adeegyada dadwaynaha, gaar ahaana ay helayaan bulshada la takoori jiray.
- Waxay kordhisaa adeegyada qiimaha jaban ee la siiyo bulshada ayadoo la adeegsanaayo iskaashi u dhexeeya maamulada iyo adeeg bixiyaasha.
- Waxay maalgelin ku samaysaa dookhyada kale ee tamarta si loo buuxiyo baahiyaha mudada fog ee tamarta loona yareeyo waxyeelooyinka bii'ada gaara.
- Waxay qasab ka dhigaysaa qorshayn si loo helo adeegga interneedka oo qiimo jaban, raaxo leh, lana isku halayn karo oo ay helaan ganacsiyada iyo guryaha dhammaan dakhliyada kaladuwan, ayadoo muhiimada la siinaayo meelaha aan adeegga la siin jirin.
- Waxay u baahan tahay in looga baaraan dago isbadelka cimilada, dhaqaalaha, iyo saamaynada caafimaadka marka la abuurayo xarumaha adeegyada bulshada.
- Wuxuu dhiiri geliyaa u diyaar garoowga masiibada iyo qorshaynta soo kabashada si loo xaqiijo adkeysiga xarumaha dadwaynaha, adeegyada guryaha, iyo kaabayaasha.

### Waxaan U baahan Nahay Fikirkaaga!

Haddii aad doonayso inaad faallo guud bixiso, aad su'aalo ka qabto CPP ama maaraynta kobaca, ama doonayso inaad door ku yeelato, fadlan iimeel u dir [gmpc@kingcounty.gov](mailto:gmpc@kingcounty.gov) ama la xariir Ben Larson adoo wacaaya (206) 263-9560.

### Waa maxay Countywide Planning Policies?

Countywide Planning Policies ama CPP waa taxanayaalka xeerar maamulada ciladaha maaraynta kobaca ee Degmada King. Growth Management Planning Council (GMPC, Golaha Qorshaynta Maamulka Kobaca) ayaa isku keena saraakiisha la doorto ee ka socda Degmada King iyo magaaloooyinka iyo maamulada hoostaga si loo abuurto xeerarka CPP.

CPP waxay bixiyaan higsiga wadanka oo dhan waana naqshada Degmada King iyo magaalada kasta oo King ka tirsan u adeegsadaan abuurista qorshaheeda gaarka ah ee balaaran, kaasoo ay qasab tahay inuu waafaqsan yahay CPP iyo [VISION 2050 \(HIGSIGA 2050\)](#).

Wixii xog dheeraad ah oo ku saabsan CPP, Qorshayaasha Waawayn, iyo xogta kale ee la xariirta maaraynta kobaca, fadlan booqo bogga Degmada King ee Regional Planning (Qorshaynta Gobalka) adoo gujinaaya [lifaqaan](#).